

# flipside

the opposite of boredom.

## Arjiga Isdiiwaangelinta ee Barnaamijka Flipside 2023-2024

### Xogta Barnaamijka Baxo Iskoolka ka Dib

3:00 p.m. – 5:00 p.m. | 4:00 p.m. – 6:00 p.m.

Isniinta ilaa Khamiista

Qeybta 1aad: October 9, 2023 – January 25, 2024

Qeybta 2aad: January 29, 2024 – May 9, 2024

### Wakhtiga kama dambaysta ah ee Isdiiwaangelinta: Jimcaha, September 22, 2023

\*Isdiiwaangelinta weli xitaa waa la aqbali doonaa taariikhda ka dib. Fadlan sug ilaa 1-2 toddobaad si looga shaqeeyo arjigaaga aad soo dirtay wakhtigii kama dambaysta ahaa ka dib.

### Waa maxay Flipside

Flipside waxay bixisaa fasallada kobcinta ee farshaxanka, sayniska, tikniyoolajiyadda, caafimaadka, jimicsiga iyo dhaqanka iyadoo isla markaana awood siinayso dhallinyarada, oo codkooda kobcinayso oo sare u qaadayso, iyo abuurista goobo ay ardaydu dareemi karaan inay ka mid yihiin bulshada iskoolka, oo ay ku guuleystaan tacliinta, oo ayna ku kobciyaan xirfadaha noloshooda, iyo inay ku qaabeeyaan mustaqbalkooda iyadoo kalsooni qabo. Flipside waxay iskaashi la leedahay waaxaha tacliinta iyo isboortiga ee SPPS Alternative Education, SPPS Athletics, iyo ururo badan oo bulshada ah oo ku baahsan magaalada oo dhan. Waxaynu rajeynaynaa inaan la kulanno ilmahaaga!

### Xaqiiqooyin Kooban

- Flipside waa u BILAASH qof walba
- Waa la soo dhaweyn dhammaan dhallinyarada fasallada K ilaa 8
- Ka-qaybqaadashada qasab ma ahan
- Cunto fudud ayaa la bixiyaa maalin walba
- Hoggaamiyaasha Flipside waxaa ku jiro macallimiin laysin haysto, shaqaalaha iskoolka iyo khubaro bulshada ka tirsan.
- Gaadiid ayaa la siinayaa dhammaan ka-qaybgalayaasha haddii ay ku qoran yihiin inay baska u raacaan iskoolka.

### Diiwaangelinta

- Mudnaanta diiwaangelinta waxaa la siiyaa dhallinyarada u baahan taageero waxbarasho.
- Foomamka diiwaangelinta waxaa laga heli karaa website-ka iskoolka iyo xafiiska weyn.
- Waxaa la iska doonayaa in la soo buuxiyo *Foomka Diiwaangelinta* iyo *Foomka Xulashada Fasalka* ka hor intuuusan ardaygu imaan.
- Imaansho joogto ah ayaa laga filayaa ardayga.

### Jadwalka Basaska & Waxa la iska Filayo

- Baska ayaa loo qorsheeyay inuu ardayda ka soo qaado goobta Flipside 4:00 p.m. | 6:00 pm
- Safarrada basasku waxay qaadan karaan 30 - 45 daqiiqo in ardayda dhammaan la geeyo guryahooda.
- Jadwalka iyo lambarka basaska waxaa ardayda la siin doonaa maalinta taariikh ahaan uu barnaamijku billaabayo.
- Waxaynu rajeynaynaa in dhammaan waaliddiinta/mas'uuliyiinta ay qaadan doonaan carruurtooda ugu dambeyn 4:00 p.m. | 6:00 pm
- Fadlan xusuusnow inaad la xiriirtid iskoolka haddii cinwaankaagu isbeddelo inta uu socdo sannad-dugsiyeedka. Haddii uu shil jiro ama basku uu si aad ah uga soo dib dhacay jadwalkiisa, fadlan shaqaalaha gaadiidka ka wac 651.696.9600.

### Waxa laga Filayo ka Qaybgalayaasha

Barnaamijka Flipside wuxuu raaca siyaasadaha iyo habraacyada Degmada sida waafaqsan *Buugga Habdhaqanka Ardayda* kaas oo laga heli karo bogga <http://www.spps.org/Page/3249>

### **Ku lug Lahaanshaha Waalidka/Masuulka ee Barnaamijkan**

Waxaynu soo dhaweyneynaa oo ku dhiirigelineynaa waaliddiinta, masuuliyiinta, iyo xubnaha bulshada inay si iskaa wax u qabso ahaan uga shaqeeyaan Flipside. Waxaa jira siyaabo badan oo aad u taageeri kartid barnaamijka oo isugu jiro inaad na caawisid wakhti aad u gaaban ama inaad si joogto ah nooga caawisid hawlahaan ay ka mid yihiin:

- Wehel noqosho (chaperone) safarrada gaaban ee waxbarasho.
- Caawinta barnaamijka sida diyaarinta, qorista magacyada ardayda timaaddo, bixinta cuntada, iwm.
- U fiirsasho iyo talo-bixin ku aaddan barnaamijka.
- Ka caawi Isuduwaha Goobta qoridda ardayda imaanayso, sawir qaadista, kormeeridda hoolalka, keydinta xogta, iwm.

Haddii aad xiisaynaysid inaad caawisid barnaamijkan, fadlan la xiriir Isu Duwaha Flipside!

Site	Name of Site Coordinator	Phone	Email
American Indian Magnet	Aliya Rivera	651.744.1264	Aliya.Rivera@spps.org
Battle Creek Middle	Jake Lingert	651.744.6924	Jake.Lingert@spps.org
Capitol Hill	Ben Fehlen	651.744.3016	Ben.Fehlen@spps.org
Creative Arts	Brett Geissinger	651.325.2450	Brett.Geissinger@spps.org
E-STEM Middle School	Lucia Scott	651.325.2582	Lucia.Scott@spps.org
Farnsworth Aerospace 5-8	Brient Pokernowski	651.744.6930	Brient.Pokernowski@spps.org
Global Arts Upper Campus	Abby Heuckendorf	651.	Abby.Heuckendorf@spps.org
Hazel Park Preparatory		651.744.6974	
Hidden River Middle	Teanna Rouillard	651.744.6969	Teanna.Rouillard@spps.org
Highland Park Middle	Nikol Gordon	651.744.6525	Nikol.Gordon@spps.org
Txuj Ci HMong Language & Culture	Kari Gonzalez	651.744.6955	Kari.Gonzalez@spps.org
Humboldt Secondary	Sharon Idowu	651.744.4300	Sharon.Idowu@spps.org
Murray Middle School	Abby Adegeye	651.744-3189	Abiola.Adegeye@spps.org
Washington Technology	Phia Yang	651.744.4414	<a href="mailto:Phia.Yang@spps.org">Phia.Yang@spps.org</a>
Transportation		651.696.9600	

**Iskuqoridda Barnaamijka Flipside ee Saacadaha Iskoolka ka dib  
October 9, 2023-May 10, 2024**

<b>Magaca Dambe ee Ardayga:</b>	<b>Magaca Koowaad ee Ardayga:</b>	<b>Magaca Ardaygu Doorbidayo:</b>
<b>Magac-u-yaalka Ardayga:</b>	<b>Lambarka Qadada #:</b>	<b>Imeylka Ardayga:</b>
<b>Fasalka:</b>	<b>Magaca Waalidka/Mas'uulka:</b>	<b>Telefoonka # Waalidka/Masuulka</b>
<b>Imaylka Waalidka/Mas'uulka:</b>		
<b>Magaca Qofka lagala Xiriirayo Xaaladaha Degdegga ah:</b>	<b>Taleefanka # Qofka lagala Xiriirayo Xaaladaha Degdegga ah:</b>	<b>Macallinka Fasallada Aasaasiga ah:</b>

**Xogaha Ardayga**

Xog noocaa ah ayaad isleedahay wuu ina anfacyaa inaynu ogaanno si ardaygaan ka kaqeybgalaha ah uu u guuleysto?

**Gaadiidka Ardayda ka Qaado Iskoolka Flipside oo Geeyo Guriga**

- Waalidka/masuulka ayaa soo qaadi doono ardayga.
- Waan u lugeyn doonaa guriga
- Waxaan u baahanahay bas iskool oo i geeyo ciwaanka gurigayga
- Waxaan u baahanahay bas aan ku aado cinwaan kale (qaraabo, xannaanada carruurta, iwm.)

Cinwaanka Kale ee aan Guriga aheyn ee gaadiidka iga qaadayo Flipside:

Cinwaanka Kale Magaca Cidda lala Xiriirayo: \_\_\_\_\_ Taleefanka # \_\_\_\_\_

**Xog loogu talagalay dhammaan fasallada:**

Flipside waa iskaashi ka dhexeeya waaxyada SPPS Community Education, SPPS Alternative Education, iyo Saint Paul Public Library. Maadaama ay ilmahaagu ka qeybgalayaan barnaamijka Flipside, waxaa loo diyaarin doonaa qorshaha waxbarashada joogtada ah kaasoo diiradda saarayo hadafyada tacliin iyo bulsho ee soo socda:

- Horumarinta xirfadaha luuqadda af-Ingiriisiga.
- Helidda xirfadaha kolleejka looga baahan yahay iyo xirfadaha shaqo oo ay ka mid yihiin ka shaqeysiinta maskaxda, xallinta dhibaatooyinka, hal-abuurka, mas'uuliyad heer bulsho ah, hawl-billaabidda iyo dabacsanaan la xiriirto jadwalka.
- Helidda xirfado ka dhisayo xag bulsho iyo xag shucuur sida adeegsiga hadalka, wadashaqaynta, hoggaaminta, xiriir wanaagsan oo lala yeesho dadka waaweyn, iyo asxaabta kaleba.

Barnaamijyada Flipside waxaa hoggaamiyo macallimiin leeyasin haysta, khubaro bulshada ka tirsan iyo bareyaal jaalliyadda ka socdo. Si aad u heshid xogo faahfaahsan oo ku saabsan Flipside, booqo boggeenna ah [spps.org/flipside](https://spps.org/flipside). Barnaamijka Flipside ma ahan qasab in laga qeyb galo, waana barnaamij bilaash ah saacadaha iskoolka ka dib kaas oo siiya ardayda dugsiga dhexe duruus kobciyo tacliintooda.

**Ogolaanshaha Waalidka/Masuulka**

Markaan calaamadeeyo qeybta hoose, waxaan qirayaa inaan ahay waalidka ama masuulka ubadka kor ku qoran. Waan fahansahay hadafyada barnaamijka oo waxaana bixinayaa oggolaanshahayga uu ilmahaagu kaga qaybqaadanayo.

- Haa
- Maya

**Oggolaanshaha Waalidka ee Sawirrada**

Shaqaalaha barnaamijka ayaa laga yaabaa inay wareystaan, sawiraan, ama wax ka duubaan ilmahaaga si loogu isticmaalo daabacaadaha, baraha bulshada, mareegaha ama si ay u muujiyaan shaqada wanaagsan ee dhallinyaradeenna iyo shaqaalaha. Sawirradu waxay noqon karaan kooxo arday ama shaqsiyaad, waxaana dhici karto in la isticmaalo magacyada koowaad ee ardayda. Si loo sugo ammaanka ardayga online ahaan, sawirka ardayga iyo magaciisa dambe hal mar laguma wada arki doono mareegaha dugsiga ama Degmada.

**Fadlan mid calaamadee:**

- Haa, waxaan oggolaaday in la sawiro oo la isticmaalo magaca koowaad.
- Qayb ahaan, waxaan oggolaaday in la sawiro, laakiin ma oggoli isticmaalka magacyada.
- Maya, ma bixinayo oggolaansho.

**Waxaan u oggolahay ilmahayga inuu buuxiyo ra'yi-uruuriyaha ku saabsan ka-qaybgalkooda iyo waayo-aragnimadooda barnaamijka Flipside.**

- Haa
- Maya

**Qiimaynta Barnaamijka & Asturnaanta Xogta Qofka**

Iyada oo qayb ka ah qiimaynta barnaamijka, xogo qaas u ah ardayda ayaa la ururin doonaa oo lala wadaagi doonaa maalgeliyayaashayeen. Ujeeddada xog ururinta waa in la qiimeeyo saamaynta barnaamijka oo waxaa naga doonayo maalgeliyaheenna. Waxaad isticmaali kartaa lifaaqa hoose si aad dib ugu eegtid Ogaysiinta Xogta Qarsoodiga. Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka baxdid ka qeybgalka hawlaha qiimaynta barnaamijka, fadlan booqo [spps.org/flipside](https://spps.org/flipside). Fadlan ka eeg [spps.org/Page/22803](https://spps.org/Page/22803) Ogeysiiska Xogta Qarsoodiga ah ee Flipside si aad u heshid macluumaad faahfaahsan (waxaa lagu qoray Ingiriis, Hmong, Karen, Soomaali, Isbaanish).

- Anigoo calaamadeynayo goobaabintan, waxaan qirayaa in aan helay nuqul ah "Ogaysiinta Xogta Qarsoodiga ee Flipside".

**Teenventure (Fasallada 6-8 ee barnaamijka maalmaha uusan jirin iskool)**

Teenventure waa barnaamij fiican oo loogu talagalay dhiirrigelinta iyo dhaqaajinta ardayda da 'da yar ee fasallada 6-8 si ay u sahamiyaan fursadaha dugsiga sare iyo shaqada xirfadaysan iyagoo booqanayo meelo ka baxsan goobtooda dugsiga ee hadda jira. Iyadoo la abaabulayo safar waxbarasho oo gaaban maalmaha uusan iskoolku jirin, barnaamijku wuxuu ardayda siinayaa waayo-aragnimo tijaabo leh iyo inay arkaan takhasusyo iyo sancooyin farsamo oo kala duwan, taasoo iyaga ku dhiirrigelinaysa inay riyoodaan mustaqbal weyn oo ay niyadda geliyaan mustaqbal lagu naalloodo.

Taariikhaha: October 19, October 20, April 9, April 11, April 12

Waxaa jiri doona isdiiwaangelin gooni ah oo loogu talagalay safarrada gaaban ee waxbarasho ee Teenventure. Fadlan hoos ku sheeg haddii aad jeclaan lahayd in lagugu daro liiska si aad u heshid xogta isu diiwaangelinta safarradaas waxbarasho.

- Haa, igu dar liiska
- Maya, ha igu darin liiska

Jadwalka hawlaha Flipside waxaa loo diri doonaa dhammaan kaqeybgalayaasha diiwaangashan ugu dambeyn Jimcaha ka hor maalinta koowaad ee uu barnaamijku billaabanayo.

Barnaamijka Flipside waxaa kafaala qaadaya waaxaha Saint Paul Public Schools Alternative Education, Community Education iyo Athletic Departments iyadoo lala kaashanayo ururro badan oo ku saleysan u adeegidda bulshada. Waxaa qayb ahaan lagu maalgelinayaa maalgelinta la dhaho Qorshaha Badbaadinta Mareykanka (American Rescue Plan) ee Degmada SPPS ilaa June 30, 2024.

Foomka Xulashada Fasalka

Lambarka Qadada #

Magaca Awoowaha ee Ardayga	Magaca Koowaad ee Ardayga:	Macallinka fasallada aasaasiga ah:
----------------------------	----------------------------	------------------------------------

**Ku soo celi arjigan Isduwaha barnaamijka baxo saacadaha iskoolka ka dib (Afterschool Coordinator) ama ku soo celi xafiiska hore Jimcaha, September 22, 2023**

\*Isdiiwaangelinta weli xitaa waa la aqbali doonaa taariikhdan ka dib. Fadlan sug ilaa 1-2 toddobaad si looga shaqeeyo arjigaaga aad soo dirtay wakhtigii kama dambaysta ahaa ka dib.

Waxaa mahadsan ururada sida wanaagsan sannadkan noola yeeshay iskaashi ku aaddan barnaamijkeena:

*ADD YOUR OWN PARTNERS in Alphabetical order*

- Waxaynu ku dhiirrigelineynaa ardayda inay ka qeybgalaan dhammaan afarta maalmood ee uu socdo barnaamijka Flipside.

Xulashooyinka Fasalka ee Isniinta & Arbacada	Xulashooyinka Fasalka ee Talaadada & Khamiista